


Qoraalka iyo sawirrada: Willem de Vink

CIISE MASIIXA

NINKA ADUUNKA BADALAYA




WILLEM DE VINK

Erayada muhiimka ah...


Barako: Dhammaan waxyaalaha wanaagsan ee uu Eebbe doonayo in uu siiyo dadka waxa uu rabo samaya.



Boqortooyada Ilaahay: Boqortooyada Ilaahay waxay joogtaa meesha ay dadku isaga ku addeecaan.



Cafis: In kastoo aan qofna uuna fahmi karin. Ilaah wuu na cafiyaa. Ilaah wuu cafiyaa haddii aad runtii ka murugooto dembiga aad samaysay oo aad diyaar u tahay inaad qirato. Cafisku waa suurtoogal sababtoo ah Ciise wuxuu qaaday ciqaabtii aan mudnayn (b.58).



Cashada rabbiga: Kuwa Ciise raacay waxay xusuustaan dhimashadiisa iyo sarakicidiisa iyagoo cunaya kibis iyo canab sharaab ah (bogga 41).




Ciise: Magaca Wiilka Ilaah, oo macneheedu yahay, 'Ilaah waa badbaadiye'.

Dembiga: Waxyaalaha aan samayno ee ka soo horjeeda doonista Eebbe oo naga hor istaagta inaan gaarno guusha uu Eebbe inoo hayo (b.4).



Ducada: Waa la hadalka Ilaah, si aamusan ama kor u qaadaya codkaaga adoo la heshiinaya isaga (b.18, 19, 42).

Iida kormarida: Waxaa loogu dabaaldegaa sarakicidda Ciise. Yuhuuddu waxay u dabaaldegi jireen Iidda Kormaridda isla maalintaas (b.38-54).



Iimaan: Waa inaad ku kalsoonaataa oo aad aqbashaa Erayguu Ilaah yiri inuu samaynayo (bogga 58).

Iskutallaabta: Qalabkii silica ee uu Ciise ku dhintay doonistiisa xorta ah. Dhimashadiisii ka dib waxay calaamad u noqotay dhammaan xerta Ciise (b.25, 50).

Kitaabka quduuska ah: Kitaabka quduuska ah waxaad ka akhrisan kartaa sida Ilaahay dadka u arko iyo sida uu ula macaamiloodo.

Malag: Waa Rasuul Ilaahay oo aan la arki karin (bogga 5).

Masiixa: 'Boqor la subkay'. Masiixa (erey Cibraani ah) oo Giriiga waxaa lagu yiraahdaa kiritoos (b.52, 55).

Noloshu weligeed ah: Noloshu aan rabbi Ciise ku noolnahay sida Ilaah ugu talo galay. Waxay ka adkaataa dhimashada oo aan dhammaad lahayn (b.23, 29-30 iyo 59).

Ruuxa Quduuska ah: Ruuxa Ilaah wuxuu ku dhex noolyahay kuwa aqbalaa rabbi Ciise (b.58).

sarakicidda: Ciise wuxuu ka sara kacay kuwii dhintay. Maalin maalmaha ka mid ah qof kastaa wuu ka sara kici doonaa kuwii dhintay. Markaasna Ilaah baa xukumi doona qof kasta (b.53-57).

Shaydaanka: Cadawga Ilaah iyo dadka ee aan muuqan (sidoo kale loo yaqaan Ibliiska).

Soo noqodka: Wax walba waxay noqon doonaan cusayb markuu Ciise dunida ku soo noqdo. Cirka iyo dhulkaba Ilaah ayaa cusboonaysiin doona (b.57).

Wiilka Ilaah: Waa Magaca Ciise. Isagoo qof ah ayuu dunida yimid, isagoo ah Wiilka Ilaah.

Xerta: kuwa Ciise raacay (b.18).



WAQTIGII UU CIISE YIMID

Taariikhdayadu waxay ka bilaabataa dhalashadii Ciise. Dadku waxay ku socdaalayeen lugaha ama dameer, geel, ama fardo. Qaybaha waaweyn ee Yurub, Bariga Dhexe, iyo Waqooyiga Afrika waxaa haysatay Boqortooyada Roomaanka. Dadka intooda badana wax ma akhrin karin waxna ma qori karin, haddana Yuhuuddii Israa'iil joogtay kaliya ayaa wax qori kartay. Waxaana loo yaqaanay 'ehlu-kitaabka'.

Ilaahay wuxuu ku sheegay kitaabka quduuska ah. Isagu waa abuuraha wax kasta oo jira, wuxuuna doonayaa inuu dadka oo dhan la saaxiibo. Ciise ayaa taas si cad u muujiyay!

WAA KUMA CIISE MASIIXA?

Ciise wuxuu ku noolaa Israa'iil qiyaastii 2,000 oo sano ka hor. Waxaan ugu yeernaa 'Ciise Masiix' ama 'Ciise Kiristoos'. Waxay la macno tahay inuu yahay Boqor. Haddana, isagu maaha Boqor oo keliya. Ciise waxaa loo yaqaan 'Wiilkii Ilaah' iyo sidoo kale 'Wiilka Aadanaha'. Taas macneheedu waxa weeye in uu Ilaahay iyo dadkba. Taariikh nololeedka Ciise waxaa laga helaa kitaabka quduuska ah. Waana taariikdii ugu weynayd aduunka.





ISRAA'IIL WAQTIGII CIISE



Caasimada: Yeruusaalem.

Gobollada: Galili, Samaariya, Yahuudiya.

Cabirka: Qiyaastii 28,000 km² (10,810 sq. milyaha).


Cimilada: Kulaylaha hoose.

Siyaasadda: Ilaa 63 BC (Masiixa ka hor) Roomaanku waxay haysteen Israa'iil.


Dawlada: Bontiyos Bilaatos, wuxuu ahaa Guddoomiyaha Roomaanka, ee Israa'iil. Tiberiyas, oo ahaa Imbaraadoorkii Roomaanka, ayaa isaga u taliyay.

Diinta: Yuhuudi. Yuhuuddu waxay macbud ku lahayd Yeruusaalem. Waxaa jira wadaaddo qabta wax kasta oo ku saabsa diinta waxaana jira macalimiin (sida Farrisiinta) oo ay tahay inay dadka wax ku baraan Kitaabka Quduuska ah.

Luqadaha: Cibraaniga (luuqada Yuhuuda), Giriiga (luqada caalamiga ah ee lagaga hadlo), Laatiinka (luuqada Roomaanka).



Maxay dadkan oo dhami webiga webiga hareerihisa isugu soo urureen?



Isdiyaariya, boqortooyada Ilaah aya imanaysa.




Nolol cusub bilaaba!



Faaskii xukunka Eebbe wuxuu hoos yaal geedaha guntooda.




Geed kasta oo aan midho wanaagsan soo bixin waa la gooyn doonaa oo dabka lagu tuuri doonaa.



Waxaa laga yaabaa in dhammaanteen sidoo kale la gooyo. Yaa awooda inuu ku noolaado nolol wanaagsan?



Dhab ahaantii! Xukunka Ilaahay ninna kama baxsan karo. Laakin aniga dabadey waxaa imaanaya mid quluubtiina bedeli kara.



Haddii aad runtii rabto in noloshaadu noqoto mid badalantay, qiro dembiyadaada ka dibna u kaalay biyahan oo ha lagu baabtiiso!





Haddaba tag oo bilow nolol cusub oo ha dembaabin mar dambe!

Qof kastaa wuxuu ugu yeedhi jiray wacdiyihii webiga agjoogay Yooxanaa Baabtiisaha.

Anigu ma ihi midka muhiimka ah. Waxaan u diyaarinayaa jidkii kan ina tusi doona Ilaaha midka uu yahay. Isagu wuxuu idinku baabtiisi doonaa Ruuxa Ilaah iyo dabka Ilaah. Taasi gabi ahaanba way idin beddeli doontaa!




Ka dibna...




Waa inaad idigu i baabtiisti!



I baabtiis oo aan yeelno doonista Ilaah.




Aabbow, boqortooyadaadu ha timaado, doonistaaduna ha noqoto.




Dabadeedna cod samada ka yimid ayaa leh...

Haa, waxaad tahay Wiilkayga. waan ku jeclahay adigana waan ku faraxsanahay.




Waxay ahayd laba kun oo sanno ka hor Yooxanaa Baabtiisaha uu Israa'iil u diyaarinayay imaatinka Masiixa. Waqtigaas Israa'iil waxay qayb yar oo ka mid ah Boqortooyada Roomaanka ee weyn.




Yuhuuda reer Israa'iil waxay dareemeen gargaar la'aan iyo dulmi. Dadku waxay rajaynayeen wakhtiga uu Masiixu iman doono. Waa Badbaadiyaha oo imaatinkiisa lagu sii sheegay kutubtii hore ee Yuhuudda. Masiixa waxa uu u dayn doonaa cadaaladda Ilaah in ay guulaysato.

Yooxanihii Baabtiisaha ahaa ee webi Urdun agtiisa joogay wuxuu fatiisa ku tilmaamayay Ciise.



Bal eeg! Waa kan Wankii eebe ee dembiyada dunida qaadayay.




Baabtiiskiisa ka dib, Ruuxa Ilaah wuxuu Ciise u kaxeeyey lamadegaanka.

40 maalmood iyo 40 habeen ayuu meeshaas joogay. Inta uu joogayna waxba ma uunan cunin. Wuu soomayay oo salaadayay si uu si cad u arko hawshiisa waxay tahay.




Si uu u guulaysto, Ciise waa in uu ku caddeeyo ulajeeddooyinka Ilaah adduunka. Waa qorshaha Ilaah in dadka laga soo daayo gacanta dhimashada.

Ciise wuxuu canaantay Shaydaanka, oo ah taliyaha mugdiga ah ee aan la arki karin, kaas oo dunida ku xukuma dhimashada iyo qudhunka.



Haa Aabbe! Waan samayn doonaa waxaad I weydiiso!




Laakiin Shaydaanka, oo ka soo horjeeda, wuxuu isku dayay inuu Ciise siiyo fikrado si uu uga fogeeyo aragtida Ilaah...

Haddii aad tahay Wiilka Ilaah, dhagaxyadan u beddel kibis!


Maya! Waxaa ku qoran kitaabka: Qofku kuma noolaan karo kibis oo keliya, laakiin wuxuu u baahan yahay erayada Ilaah.

Haddaad runtii tahay Wiilka Ilaah caddee! Iska tuur saqafka macbadka. Miyaanay qornayn in Malaa'igtu ku qaadi doonaan?



Waxaa kaloo qoran: Ilaah ha jirrabin.

Haddaad ii sujuuddid oo aad i caabuddid, Waxaan ku siin doonaa awooda dhulka oo dhan.




Iga tag Shaydaankow! Waxaa qoran: Ilaah keliya ayaa ah ka aynu caabudno oo u adeegno.

Dabadeedna Shaydaanku wuu ka tagay Ciise. Malaa'igahiina way u yimaadeen inay isaga u adeegaan...










Ciise waxaa ka buuxay Ruuxa Quduuska ah markuu Galili ku soo noqday. Ciise wuxuu ku koray gobolkan ay dadku ku badan yihiin ee waqooyiga Israa'iil. Markuu socdaalay dhawr ayaa ku soo biiray. Waxay rabeen inay ogaadaan inuu Ciise yahay Masiixa oo kii ay nebiyadu wax ka sii qoreen inuu yahay iyo in kale.

Kaana, oo ku taal buuraha Galili,
waxaa ka dhacay aroos.




Ciise sidoo kale waxa uu la
joogay hooyadii iyo qaar ka
mid ah asxaabtiisa.






Kafarna'um waa tuulo kalluumaysiga barwaaqo ku ah oo ku taal badda Galili. Halkan ayuu Ciise ku bilaabay inuu ka wacdiyo wax ku saabsan Boqortooyada Ilaahay!



Butros, aynu bartamaha badda tagno, oo shabagyadaada badda ku tuur.



Oo halkan ayuu ku doortay xertiisii ugu horraysay.




Sayidow, habeenkii oo dhan waannu dadaalnay oo waxba ma aannu qaban.



Laakiin haddii aad sidaas dhahdo...



Waa maxay! Ma rumaysan karo!



Yacquubow!
Yooxanow!
Halkan
kaalay! Waa
soo qabanay
kaluun
weligeen
nagu filan!




Rabbiyow, waxaan
ahaybambiilee iga fogow.

Ha cabsan, Butros!



Kaalay oo i soo raac!
Waxaan dhigayaa ku
dadka kalluumaysata!



I soo
raaca!




Ciise wuxuu kula wareegay Galili oo dhan isaga iyo xertiisii, isagoo qof walba u sheegaya wax ku saabsan Boqortooyada Ilaah. Wuxuu bogsiyay cudur kasta, jinniyadii ayuu saaray, dadkiina way yaabeen oo raacaan. Xitaa waxay ka yimaadeen gobollo kale iyo Yeruusaalem oo ah caasimadda Israa'iil. Wax walba uu yiraahdo ayay aqbaleen...




Waxaa barakaysan masaakiinta. Boqortooyada jannada iyagaa iska leh.


Waxaa barakaysan kuwa u gaajaysan cibaadada, waayo, way dhergi doonaan.



Waxaa barakaysan kuwa ooya, waayo, mar kalay qosli doonaan.



Waad barakaysan tihiiin haddii dadku si xun idiinla dhaqmaan aniga daraadday. Farxa oo reyreeya, waayo, jannada abaalgudkiinnu waa weyn yahay.





Qof walba ula dhaqan sida aad jeceshahay in laguula dhaqmo.




Ku alla kii naag u fiirya sida isagoo damac ka galay, islamarkaaba qalbiguu ka sinaystay.




Ha ka welwelina berrito. Marka hore ka fiirsada boqortooyada Ilaah, dabadeedna waxyaalaha kale way idin soo raaci doonaan.



Cadawgiinna jeclaada oo u duceeya.



Ishu waa iftiinka jidhka. Haddii ishaadu iftiin noqoto jidhkaaga oo dhan ayaa iftiimi doona. Laakiin ishaadu hadday shucaac boqoto, waxaad ku dhex nooshahay gudcur.



Haddaad erayadayda raacdid, waxaad la mid tahay mid gurigiisa dhagax ka dul dhisay. Haddii aadan sidaas yeelin, waxaad noqon doontaa sida qof ciid ku dul dhistay.




Wanaag markaad falaysaan dadka haystusina ee si qarsoon qalbiga uga sameeya.



Ninna laba sayid uma adeegi karo; waa inuu u adeegaa Ilaah ama maal.


Maalin maalmaha ka mid ah dadkii waxay yimaadeen guriga Ciise ee Kafarna'um.

Innaba ma gali karno.



Wuxuu dul joogaa saqafka; furaash iyo waxyaala kalena way muuqdaan!


Sidee buu waxaas u odhan karaa, Ma maqasheen wuxuu yidhi?



Ilaah buu caayayaa!

Ilaah keliya ayaa qof dembigiisa ka cafiyi kara!


Maxaa ka hawl yar in nin curyaan ah lagu yidhaahdo, Dembiyadaadu waa cafiyan yihiin, mise Kac?



Maxaa halkaas ka dhacaya?




Iska daa! Dadkani waxay leeyihiin iimaan weyn!



Dembiyadaadii waa lagaa cafiyay!

Masiixu wuxuu leeyahay amar uu ku cafiyo dembiyada. Laakiin waxaan kaloo leeyahay: Furaashkaaga qaado oo soco!






Waa Cajiib!


Haa! Waan socon karaa!

Wuu socday!

Laakiin dadku badanaa kuma qanacsanay ficillada Ciise. Hogamiyeyasha diintu waxay sugayeen Ciise uu ilaalinayo qaynuunka sabtida. Maalintan dalka Israa'iil waxaa aad looga mamnuucay in la qabto shaqo kasta.



Ninkan gacantiisu waa naafo. Ma bannaantahay maalintan in la bogsiiyo?



Gacantaada soo fidi!




Waa yaab! waan bogsaday!



Madaxda Yerusaaalem waa in loo sheegaa inuu quruunta habaabinayo.

Ciise ayaa xertiisii kula socday badda Galili.







Sayidow! Na
caawi waan
tiimbanaynaaye!



Maxaad u
baqaysaan? Aaway
iimaankiinu?









Waxaa jiray nin jinni qaba oo buuraha ku nool...




Haa wuu soo socdaa!

Wuu soo socdaa!



Haa, Haa waa Ciise qudhiisii!



Wiilka Ilaaha qaadika ahow Maxaan kaa haysanaa?

Siidaaya ninkan, jinniyow.








Magacaa?


Legion, sababtoo ah waxaa jira qaar badan oo naga mid ah.



Noo fasax aanu doofaaradaas galnee.

Taga!







Waxaan idin leeyahay: Wiilku keligiis waxba ma samayn karo. Kaliya wuxuu sameeyaa wuxuu ka arko Aabbaha oo samaynaya. Iskuma dayo inaan doonistayda sameeyo, laakiin waxaan sameeyaa doonista Aabbahay. waana kii i soo diray.




Ciise wuxuu si joogto ah u aadi jiray meel xasilloon si uu ugu tukado.




Habeenkii salaadda ka dib Ciise wuxuu doortay 12-kii rasuul. Laba laba ayuu u diray. Wuxuu iyaga siiyay amar ay ku xukumaan jinniyada iyo cudurradda oo dhan.



Walaalahani waa Butros iyo Andaros.




Walaalaha Yacquub iyo Yooxanaa...




Filibos iyo Nataana'el...


Toomas iyo Matayos (kaas oo hore u ahaan jiray cashuurqaade dadkii Roomaanka haystay)...



Tewflos iyo Yacquukii kale...



Simoon, dagaalyahankii iska caabinta, iyo Yuudas Iskariyod...




Taga oo Ku alla kii idin aqbala wuu i aqbala, ku alla kii i aqbalaana, wuxuu aqbala kii i soo diray.




Dalaggu wuu badan yahay laakiin shaqaaluhu waa yayihiin. Rabbiga dalaga barya inuu shaqaale u soo diro beergoyska.

12-kii rasuul waxay soo noqdeen iyagoo ku faraxsan hawshooda. Waxyaalahaas ka dib Ciise wuxuu damcay inuu iyaga la tago meel xasilloon, laakiin dadkii badnaa ma ayna doonayn inay ka tagaan.



Ciise isagoo wacdinaya ayuu dadka bogsiiinayay. Gabalkuna wuu sii dhacayay...



Filibos, sidee bay dadkan oo dhan cunto u heli doonaan? Maxaad waxau cunaan u siin weydeen?

Sideed bilood musharkeed xitaa ma deeqdo!



Waa kan wiil wata shan xabbo oo kibis ah iyo laba kalluun oo yaryar. Waa intaas oo dhan.

Waxaad ka dhigtaan inay u fadhiistaan koox koox.




Ilaah ayaa mahad iska leh...

Kibista iyo kalluunka ayuu u googooyay.



Kumanaan kun oo qof ayaa la quudiyay sida uu Ciise u badiyay cuntada...



Waa inaan isaga ka dhignaa boqorkeena!








Waa inuu yahay Masiixa la filayo inuu yimaado.



Bal eeg!
Waxaa haray 12 dambiilood oo buuxa!

Waa inay dadku guryahooda aadaan. Doonta raaca oo dhanka kale u talaaba Waxaan sii joogayaa meeshan buuraha si aan u tukado.






Waxaa jira dad doonaya inay ku dhawaaqaan Ciise inuu yahay boqor. Waxay rajeynayaan inuu hogaamiye u noqdo oo laga saari doono gumaystayaashii Roomaanka. Kuwa ka soo horjeeda Ciise sidoo kale way sii kordhayaan. Waxay si joogto ah isaga dhaleeceeyaan. Waxay rabeen inay dadku isaga ku kacaan oo ka takhalusaan.



Sayidow, goormaad timid halkan?

Ma waxaad ii raadinaysaan kibista aan idin siiyey aawadeed?

Anigu waxaan ahay bixiyaha kibista nolosha weligeed ah. Waa jidhkayga allabariga loo bixiyey nolosha dunida aawadeed.



Sidee buu ninkani jidhkiisa inoo siin karaa si aanu cunno?


Waa Qashin!



Idinkuna ma waxaad doonaysaan inaad tagtaan?




Ha ka welwelina cuntada halaabaysa, laakiinse waxaad ka welweli doontaan cuntada sii jiri doonta oo nolosha weligeed ah siinaysa.







Kaalaya meeshan ka tagnee!

Dadku khayaaneeyaa.



Rabbiyow, xaggaeen kaa aadaynaa? Waxaad leedahay erayada nolosha!




Meel ka baxsan magaalada Yerusaaalem oo badanaa dadka lagu dilaa. Waxay iskutallaabta ku qodbeen, taasoo ah ciqaab dil ah oo Roomaan ah.



Mid uun hadduu doonayo inuu iga mid ahaado, ha diido doonistiisa, iskutallaabtiisana ha qaado oo ha i soo raaco.

Ku alla kii naftiisa xajiya, waa lumin doonaa. Laakiin kan naftiisa u lumiya aawaday waa heli doonaa.



Waa inaad tan ogaataa, waxaa jira Ilaah keliya.

Muhiimadu waa in aad Ilaah la jeclaato wax kasta oo kugu jira, iyo in aad dadka kale u jeceshahay sidaada oo kale!




Waqtigaan waxaa Israa'iil ku yaal tuulooyin baras qaba. Baraska waa cudur maqaarka laga cabsado. Kuwa cudurka qaba looma ogola inay la kulmaan dadka caafimaadka qaba.



Dadka baraska qaba way qayliyaan markay meel kasta tagaan si ay dadka uga digaan inay imanayaan.

**Baraska qaba!
Baraska qaba!**



Ciise! Ustaad! noo naxariiso.






Tag oo wadaadk a is tusa!




u tag wadaadka? In la baaro?


Ma markaas ayaan bogsan doonnaa?



? !




Bal eeg! waan bogsaday!




Waan ka bogsannay!


Haa!



Halleluyah! Ilaah baa wanaagsan! Mahadsanid!



10kiina sow ma wada bogsaneen? Aaway kuwii kale? Miyaanay u iman inay Ilaahay ku shukriyaan?



Kac! Rumaysadkaagu kuma dawayn oo kaliya, laakiin sidoo kale ku badbaadiyay.

Hogaamiyihii Yuhuuda ee Yeruusaalem joogay waxay addoommaddii u soo direen Ciise si ay u soo basaasaan isaga intuu safrayay. Waxay gabi ahaanba ka soo horjeedaan falalkiisa.


Wuxuu la shaqeyaa dadka sumcadda xun sida dhillooyinka, saraakiisha canshuuraha ee la macaamilka Roomaanka...

Masiixu wuxuu u yimid inuu raadiyo kuwa lumay oo badbaadiyo.




Maxaa yeelay, Ciise sabtida wax buu bogsiyaa...

Bogsoonow!












Carruurtuna waxay leeyihiin dareenkiisa gaarka ah...

Carruurtu ha ii yimaaddaan. Boqortooyada Ilaah waxaa leh dadka iyaga oo kale ah.




Ciise waxa loogu yeedhay Beytaniya, tuulo aan ka fogayn Yerusaaalem. Laasaros waa buko. Laasaros iyo labadiisa gabdhood ee Maarta iyo Maryan waxay saaxiibo wanaagsan yihiin Ciise. Ciise markuu Beytaniya yimid wuxuu maqlay in Laasaros la aasay afar maalmood ka hor.





Maamulka Yerusaaalem ayaa aad uga walaacsan Ciise iyo xertiisa.



Ninkaas oo sameeyay mucjisooyin badan.

Haddii aan taas sii wadno Roomaanku tallaabo ayay qaadi doonaan!

Waxay dumin doonaan macbudkayaga iyo quruuntayada.



Isticmaal caqligaaga guud! In dalka oo dhan la dumiyo nin qudha ayaa ummadda u dhintaa ayaa dhaanta.



Taasi waa sababta Ciise waa in la dilaa!




Isla wakhtigaas wixii ka dambeeyey hoggaamiyayaashii Yuhuuddu waxay raadiyaan fursad ay Ciise ugu gacan geliyaan Roomaanka. Iyaga ayaa ah kuwa kaliya ee loo oggolaaday inay bixiyaan ciqaabta dilka.




Ciise intuu Beytaniya joogay...




Cadarkaas! Waxay ku kacaysaa hanti badan!



Maryan!




Waxaa noo fiicneyd inaan lacagta masaakiinta siino!







Iska daa, Yuudasow. Waxay u diyaarisaa jidhkayga aasniinta.


Dhawaan waxay noqon doontaa Iiddii Kormaridda. Dad aad u tiro badan ayaa u socdaalaya Yerusaaalem.




Yerusaaalem madaxdu waxay qorsheynayeen inay Ciise qabtaan. Si kastaba ha ahaatee, weli wuxuu ku sii socdaa magaalada.



Macbadka ku yaal caasimadda
ayaa ah xarunta cibaadada.




Inta lagu jiro Iiddii Kormaridda
baraar waa la qalaa.




Baraar baa macbudka
dhexdiisa lagu bixiyaa si ay
dadka ula heshiiyaan Ilaah.



Laakiin wankee allabarigu
dadka ka xorayn karaa
dembiyadooda?







Barxadda macbadka dadku waxay ku
mashquulsan yihiin ka ganacsiga iyo
beddelka lacagta.




Ciise ayaa sidoo
kale halkaas...







Guriga Ilaah waa guri tukaneed laakiin waxaad ka dhigtay god tuugo.




Isagu waa khatar, dadku waxay ku dhegaan ereygiisa.



Waa inaan isaga ka takhalusnaa dhaqso!



Haddii aan isaga khiyaano waxa laga yaabaa inaan awoodno inaan helno isaga. Markaas ayaan isaga dili karnaa.



Laakiin ma aha inta lagu jiro iidda. Ma rabno wax dhibaato ah inta lagu jiro Iidda Kormaridda.



Immisa ayaad i siinaysaa hadaan isaga idiin keeno?

Kaasi waa Yuudas oo xertiisa ka mid ah!




Ciise ayaan idiin soo gacan galin doonaa!




Waxaan ku siin doonaa 30 xabbaa oo lacag ah; oo ah qiimaha addoonka lagu iibiyo.



Ciise wuxuu ku qaatay
maalmo ka hor Iiddii
Kormaridda isagoo
wacdinaya dadka
macbudka jooga, in kasta
oo madaxdu ay had iyo
jeer isku dayaan inay isaga
ku adkeeyaan.



Fiidkaas Ciise iyo 12kiisii rasuul waxay ku
kulmeen magaalada si ay u wada cunaan
cashada Iidda Kormaridda.







Waxaan filanayay inaan Iidda Kormaridda idinla cuno intaan la silicin.




Dadka madaxda ah waxay doonaan inay kuwa kale u adeegaan, laakiin idinku sidaas oo klae inaad noqotaan ma aha.






Oo midiidinkii dadka oo dhan hogaamiye ha idiin noqdo.




Annigu waxaan dhexdiina u joogaa sida adeege oo kale.








Mar walba tan sameeya si aad ii xasuusataan...



Kibistan cuna, waa jidhkaygee.



Canabka cuna, waa dhiiggayga u daadanaya aawadiin. Sidaas buu Ilaah axdi cusub idiinla dhiganayaa.




Waxaan idin siinayaa qaynuun cusub, isjeclaada sidaan idiin jeclaaday.



Haddii jacaylkanu idinku dhex jiro, dhammaan waxay garan doonaan inaad xertaydii tihin.



Sayidow, meelkasta oo aad tagtid waan kuu raacayaa. Naftaydana waan kuu hurayaa.



Butros, markuu diiqu ciyo, saddex goor ayaad i dafiri doontaa.

Makhribkii dabadeed Ciise iyo xertiisii ayaa magaaladii ka baxay. Yuudasna lama joogin iyaga...

Waan idinka tegayaa, laakiin Aabbuhu wuxuu idiin soo diri doonaa Ruuxa Quduuska ah. Wuu idin caawin doonaa oo had iyo jeer wuu idin la jiri doonaa.


Meesha aan u socdo waad garanaysaan.

Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma iman karo inuu xagayga soo maro mooyee.


Halkan Wax yar sii jooga, meel xagaas ah ayaan tagayaa oon ku soo tukanayaaye.

Aabe, hadday suurtoowdo, dhibaatan iga fogee.

Si kastaba ha ahaatee, doonistayda yaanay noqon doonistaada mooyaane.



Sideed u seexan kartaan wakhtigan oo kale? Kaca! Kii i gacangelin lahaa waa kan!



Qabta Ciise waa kan aan dhunkan doonee.



Haye Sayidow!

Yuudasow, ma waxaad Masiixa ku gacangelinaysaa dhunkasho?



Rabbiyow, ma dagaalannaa?



Maya!



Ciise ayaa u oggolaaday inay isaga qabtaan. Xertiisii ayaa kala carartay.

Ciise waxa loo geeyey wadaadkii sare oo ahaa madaxa hoggaamiyayaasha Yuhuudda oo dhan. Butros iyo Yooxanaa baa meel fog ka soo daba socday.



Butros wuxuu galay barxadda.



Miyaanad isaga lasocon?



Maya! Xataa ninkan ma aqaano.

Waxaad tahay mid iyaga ka mid ah soo ma aha?







Inaba, maya!


Waan hubaa! Halkaas ayaad joogtay! Waxaad tahay reer Galili!

Ma garanayo waxaad ka hadlayso.







Ciise waxaa loo keenay taliyihii Roomaanka, Bilaatos.
Hogaamiyihii Yuhuuddu waxay abaabuleen dadkii.
Waxay ku qaylinayaan eedaymo kala duwan.



Eedeymahaas oo
dhan maxaad ka
leedahay? waxba?



Wax khalad ah kuma helin.
Waxaa soo dhow iiddii
Kormaridda. yaan idiin sii
daayaa; Baraabbas mise
boqorkii Yuhuudda?





Maxaad
samaysay?

Waxaan u imid
inaan runta u
marag furo.




Waa maxay
runtu?





Barabbas!

Barabbas!




Laakiin maxaad doonaysaa inaan Ciise ku sameeyo?

Iskutallaabta ku qodob!


Wuxuu u malaynayaa inuu Boqor yahay!

Haddaad isaga sii dayso, saaxiib la ma tihid Kaysar.



Hadda wax dambi ah kuguma haysano.

Barabbas waa la sii daayay. Waxaa lagu xukumay bay ahayd dambi dil siyaasadeed.



..., 37, 38, 39!



Anigu gacan kuma lihi.



Nabad ha kuu ahaato, Boqorka Yuhuuddow.



Bal eeg!
Ninkaas!


Iskutallaabta
ku qodob!

Iskutallaabta
ku qodob!

Iskutallaabta
ku qodob!




Bilaatos ayaa saxeexay xukunka.
Iskutallaab ku qodobku waxay ahayd dhimasho aad u silic badan.
Ciise waxa uu sitay skutillaabtii lagu qodbi lahaa isaga oo la dhex maraya waddooyinka Yerusaaalem.







Goobta dadka lagu qodbayay waxay ahayd meel ka baxsan magaalada. Waxaa lagu magacaabaa Golgota, meesha dhakada.



Halkan askartu waxay Ciise ku qodbeen iskutallaabta.





Waxa iskutallaabta dusheeda lagu qoray qoraal saddex luqadood ku qoran oo leh: "Ciise, Boqorka Yuhuudda."



Ciise wuxuu diiday inuu khalkii cabo.




Askartu waxay u qori turrteen dharkiisa.



Haa! Miyaadan kuwa kale badbaadin?

Haddii aad tahay Wiilka Ilaah iskutallaabta ka soo deg!




Naftaada iyo annagaba na badbaadi!

War Ilaah ka cabso. Annagu khaladaadkeena ayaa nalagu ciqaabay isaguse waxba ma galabsan.



I xasuuso markaad gasho boqortooyadaada!

jannadaad igula jiri doontaa maanta.



Qiyaastii 6-dii duhurnimo ayay qoraxdii madoobaatay, oo aduunkii oo dhan muddi noqday.



Maryan oo ahayd Ciise hooyadiis iyo Yooxanaa oo xertiisa ahaa ayaa iskutallaabta ag taaganaa.

Hadda waxaad tihiin wiil iyo hooyadii.



Ilaahayow, Ilaahayow, maxaad ii dayrisay?



Waan harraaday!




Ruuxayga gacmahaagaan gelinayaa.



Waa... dhammaatay.

Ciise wuxuu dhintay saddexdii galabnimo.
Hal askari ayaa dhinac ka muday Ciise; biyo
iyo dhiig ayaa ka soo daatay.



Kutubtu waxay ku leedahay:
“Waxa loo kaxeeyey sidii wan
la gowracayo oo kale.”



Waxaa loo muday oo loo
burburiyay dembiyadayada.
Laakiin hadda wuu dhintay.



Isagu ma Masiixa iman
lahaa mise ma aha?



Kaalaya, aan weyddiinno
haddii ay noo fasaxaan
inaan xabaalno.



Yuusuf kii reer Arimataya iyo Nikodemos ayaa
meydkii Ciise qaaday. Oo intay kafanktii dhir udgoon
kula duudduubeen ayay qabriga galiyeen.



Ka dib xilliga nasashada, taas oo ah qayb ka mid ah Iidda Kormaridda, dhowr dumar ah oo barooranaya ayaa tagay xabaashii dhagaxa lagu daboolay.




Dhagaxii waa laga giraangiriyay

Maxaad kan nool uga dhex doondoonaaysaa kuwii dhintay? Wuu kacay. Tag oo xertiisii u sheeg!







Butros iyo Yooxanaa waxay u ordeen xabaashii markay waxan maqleen.



Maxaa dhacay?


Qabrigii Waa madhan yahay!





Maalintaas laba xerta Ciise ka mid ah oo niyad jaban ayaa isku aragnay iyaga oo wada sheekaysanaya nin meesha marayay oo ku saabsanaa daldalaadda Ciise...

Haddaba miyaydnaan rumaysnayn nebiyada? Masiixu miyaanay ahayn inuu silco si uu ammaantiisa u galo? Dhammaantood waxay ku qoran yihiin buugaagta!



Markii ay cuntada cunayeen ayay ninkii martida ahaa meesha ka waayeen...

Laakiin kaasi wuxuu ahaa Ciise qudhiisa!



Isla markiiba way baxeen si ay u helaan xerta kale ee Ciise.


Waxaan aragnay Sayidkii!

Maryan iyo Butros sidoo kale way arkeen!




Si lama filaan ah...

Nabadi ha idiin ahaato!









Miyaadan I aaminin inaan aniga ahay? Bal eega gacmahayga iyo cagahayga!




Rabbigayga iyo Ilaahayga!

Ciise wuxuu u muuqday xertiisa 40ka maalmood ee soo socda. Xitaa wuxuu u muuqday 500 oo qof hal mar. Maalin maalmaha ka mid ah rasuulladii qaar ayaa badda Galili ka kalluumaysanayay...





Butros, runtii ma i jeceshahay?




Ciise ayaa Butros waydiiyay su'aashan saddex jeer...




Haa Rabbiyow, waad ogtahay inaan ku jeclahay.

Idahayga ilaali!



I soo raaca!

Waxaan la I siiyay awooda samada iyo dhulka ku jirta oo dhan. Adduunka gala oo quruumaha oo dhan xertayda ka dhiga. Ku baabtiisa magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuska ah, oo bara inay yeelaan waxaan idinku idhi oo dhan.



Xusuusnaada, mar walba waan idinla joogaa, maalin kasta ilaa dhammaadka adduunka.

Hadalladaas ka dib Ciise kor ayuu samada ugu baxay. Laakiin waxaa kaloo sheegay inuu u soo noqon doono inuu xukumo dadka oo dhan.


Xertiisii Yerusaaalem ku sugnayd oo tukanaysay. Ruuxa Quduuska ah ayaa ka buuxsamay. Isla Ruuxa Ciise ku jiray ayaa haatan ku dhex nool iyaga. Isagu wuxuu awood u siinayaa inay noqdaan dad cusub oo si xoog leh uga markhaati fura Ciise.

Geeridu Ciise way hayn kari wayday. Ilaah ayaa soo nooleeyay oo isaga ka dhigay Rabbiga Masiixa ah.



Xerta Ciise ayaa aduunka u wada baxday in kasta oo ay jiraan mucaaradnimo weyn.

Ciise waa Wiilka Ilaah!





Fariintan waxa kale oo lagu shaaciyey qoraal.

Wuxuu dembiyadeennii ku qaaday jidhkiisa markuu ku dhintay iskutallaabta dusheeda. Taasi waa sababta aynu dembiga ugu dhimannay oo hadda ka dib aynu u noolaan karno sida Ilaah inaga doonayo.

Hadda xerta Ciise ee adduunka oo dhan joogta waxay u kulmaan si ay u wada tukadaan oo ay u qaybsadaan erayga Ilaahay. Waxay wax ka cunaan kibista oo wax ka cabaan canabka si ay u xasuusiyaan dhimashadii Ciise. Waa rabitaan Ilaah inay la wadaagaan jacaylkiisa kuwa kale, kaas oo ku nool qalbigooda.

Ciise wuxuu suura
galiyay ujeeddooyinka
Ilaah ee dadka.



Ciise wuu ina jecel
yahay! Ku shukriya oo
caabud isaga.



Ilaah dunida aad buu u jecel yahay oo
wuxuu siiyey Wiilkiisa keliya. Mid
kasta oo isaga rumaystaa mar dambe
ma lumi doono, laakiin wuxuu heli
doonaa nolol weligeed ah.

WILLEM DE VINK

KITAABKA QUDUUSKA AH

Taariikhda Ciise waxay ku qoran tahay Kitaabka quduuska ah. Ma jiro kitaab hada ka hor in badan la akhriyay ilaa haddana la akhrinayo Kitaabka Quduuska ah mooyaanee. Kitaabka quduuska ah waxaa ku jira kitaabo badan. Waxay ku qaadatay 1500 sano in la qoro dhammaan buugaagtaas. Itaabka quduuska ah waxa la dhameeyay 1900 oo sano ka hor. Waxay ka kooban yahay dhammaan noocyada taariikhyada ku saabsan sida Ilaah ugu lug leeyahay noloshu dadka. Taariikhda Ciise waxay si cad u muujinaysaa Ka Ilaah yahay.

TAARIIKHDA CIISE


Kitaabka quduuska ahu wuxuu ka kooban yahay 4 kitaab oo sheegaya noloshii Ciise. Waxay ku magacaaban yihiin qorayaasha. Qorayaashaasuna dhammaantood waxay noolaayeen wakhtigii Ciise.

1. **Matayos** - Wuxuu ka mid ahaa xertii Ciise. Shaqadiisu Waxay ahayd cashuur ururiye. Waxa uu si gaar ah u tilmaamay sida Ciise ula macaamilooday reer Israa'iil (Yuhuudda).

2. **Markos** - barigaas uu Ciise adeegayay wuxuu ahaa dhawr iyo toban jir dhalinyaro ah. wuxuu wax yar ka qoray mucjisooyinkii Ciise sameeyey.

3. **Luukos** - wuxuu ahaa dhakhtar caafimaad. Isagu shakhsi ahaan ma uu aqoon Ciise. Luukos wuxuu qeexay sida Ciise ula macaamilooday.

4. **Yooxanaa** - sidoo kale wuxuu ka mid ahaa xerta Ciise. Waxa uu badanaa noo muujiyay shakhsiyada Ciise. Ciise waa Ilaah, kan noqday qof inuu dadka dembiyadooda ka xoreeyo.




DHALASHADA CIISE

Ciise hooyadii, Maryan, weli may guursan markay Ciise uuraysatay. Waxay weli ahayd bikrad ilaa uu ka dhashay. Si kastaba ha ahaatee Ilaah wuxuu u diyaariyey in Ciise ka dhasho. Mucjisadan waxaa lagu sheegay buugaagta la qoray wakhti ka horeeyay Ciise. Ciise dhalashadiisu ma ahayn sida geesi oo kale ama qof caan ah. Hooyadii oo safar ah ayaa wayday meel ay ku dagto, marka waxay ku dhashay xero dhexdeed.




MUCJISOOYINKII CIISE

Ciise wuxuu sameeyey mucjisooyin badan. kitaabku wuxuu sheegay in ka badan 40 bogsiino. Mucjisooyinkan, Ciise wuxuu ku tusay awoodda Ilaah iyo jacaylkiisa iyo inuu doonayo inuu dadka caawiyo oo uu ka farxiyo.



DHIMASHADII IYO SARAKICIDDII CIISE



Muxuu Ciise u dhintay? Sharaxaada waxaa lagu sheegay Kitaabka Qudduuska ah.

Dadka oo dhan waxay sameeyaan waxyaabo khaldan mararka qaarkood. Waxyaalahaasna Illahay raali kama aha, oo xitaa wuu ka cadhoodaa. Waxaana loo yaqaan dembi.

Dembiyadaas oo dhan waxay dadka ka hor istaagi karaan inay Ilaah la saaxiibaan.

Waa sababta Ciise u yimid. Doonistiisa awgeed ayuu Ciise u qaatay ciqaabta

dembiyadeenna. Ciqaabtaasi waxay ahayd dhimasho. Mar haddii Ciise inoo dhintay,

waxaynu mar kale noqon karnaa saaxiibaha Ilaah. Laakiin waxaan na looga baahanyahay inaan ka xumaano wixii aan ku khaladnay.

Ciise ayaa ka sara kacay kuwii dhintay. Ilaahay wuu soo nooleeyay mar kale. Taas buu Ilaah ku tusay inuu ka awood badan yahay dhimashada.

Ciise hadda wuxuu la nool yahay Ilaah. Sababta oo ah isagu wuu nool yahay, wuxuu had iyo jeer noqon karaa saaxiibkeen. Isagu wuxuu rabaa inuu nagu caawiyo inaan u noolaanno si Ilaah noogu farxo.

DUCO

Hadii aad ka xuntahay khaladka aad samaysay iyo hadii aad rabto in aad la saaxiibto Ilaahay, waxa aad ku ducaysan kartaa ducó sidan oo kale ah:

“Ilaahayow, adaa i jecel.

Waxaad I siisay Ciise, oo ah Wiilkaaga keliya.

Wuxuu ku dhintay iskutallaabta dusheeda, dhammaan xumaanta aan sameeyey aawadeed.

Fadlan iga cafi wixii aan kun qaldamay. Waan ka xumahay.

Waad ku mahadsan tahay, in Ciise uu ila jiro.

Had iyo jeer waxaan rabaa in aan noqdo kaaga.

Fadlan ma iga caawin doontaa inaan u noolaado sidaad rabto inaan u noolaado? ma ii soo dhowaan doontaa?

Waad ku mahadsan tahay jawaabta aad iga siisay ducadayda.

Waxaad samaysaa wixii aad ballan qaaday!”

CIISE IYO ADIGA

Taariikhda Ciise waxay leedahay dhamaad wanaagsan. Ciise wuxuu saaxiib la la ahaa dad badan, waagii hore iyo haddaba. Adduunku wuu is beddelay. Dad badan ma raacaan dameeraha ama fardaha ee waxay raacaan baabuur iyo diyaarad. Laakiin tani wax farqi ah uma samaynayso Ciise. Waagii hore siduu Israa'iil u dhex joogay maantana wuu ina garab joogaa. Waxaa laga yaabaa inuu yahay mid aan la arki karin, laakiin wuu joogaa. Wuxuu rabaa inuu maanta saaxiib kuu noqdo. Waxa lagaa rabaa inaad isaga dhegaysato oo aad isaga jeclaato.

Ma doonaysaa inaad wax badan ka ogaato Ciise iyo noloshu aad isaga kula noolaan karto? Markaa waxaad samayn kartaa waxyaabaha soo socda:

1. Bilow inaad shakhsi ahaan u akhrisato **Kitaabka Quduuska ah**

(ka bilow tusaale ahaan inaad akhrido qaybta uu qoray Luukos).

2. Bilaw inaad tukato

(Ilaah la hadal iyo dhegaysigiisa – uma baahnid inaad erayo gaar ah isticmaasho).

3. Dadka kale u sheeg wax ku saabsan Ciise

iyu Kitaabka quduuska ah. Ciise waxa uu rabaa in xertiisa ay wada kulmaan oo ay is dhiirigeliyaan oo wax badan ka bartaan isaga.

Qoraalka iyo sawirrada: Willem de Vink.

Xuquuqda daabacaadda © 1993

Stichting Wereldtaal, Houten, The Netherlands.

Waxaa lagu daabacay Dutch sida “Jezus Messias”.

Daabacaada afka Soomaaliga (Itoobiya) © 2024

Xuquuqda daabacaadda dhijitaalka ah ee hoos timaada shuruudaha

shatiga Hal-abuurka Commons BY-SA.

e-mail : jmpbk.app@gmail.com

<https://www.jesusmessiahcomicmedia.com/ethiopia>



Ciise Masiix Tani waa sheekada dhabta ah ee Ciise Masiix. Wuxuu ku noolaa Israa'iil qiyaastii 2000 oo sano ka hor. Qof kasta oo la kulmay wuu yaabay. Qofna ma samayn waxa uu sameeyey. Qofna weligii ma odhan waxyaalaha uu yidhi. Mucjisooyin ayaa ka dhacayay meeshii Ciise joogay. Oo wuxuu u keenay farxad iyo raynrayn dhammaan intii danaynaysa inay maqlaan isaga. Haddana si lama filaan ah ayay u soo dhammaatay. Cadawgiisii ayaa dilay. Laakiin taasi ma ahayn dhamaadka. Akhri naftaada sida ay wax u dhaceen oo arag sida ay sheekada Ciise Masiix u sii socoto!



Luuqada: Soomaaliga (Itoobiya)

Language: Somali (Ethiopia)

ISBN: 978-94-93321-60-1